

Helitaanka Tallaalida COVID-19 ee Degmada King



Waxaan hadda haysannaa tallaallo nabdoon oo wax ku ool ah oo naga ilaaliya COVID-19.



Tallaallada COVID-19 waxaa lagu bixiyaa lacag la'aan. iyadoon loo eegin caymiska caafimaadka, muwaadinnimada, ama xaaladda socdaal. Tallaalka waxaa bixindoona Medicare, Medicaid, caymiska gaarka loo leeyahay, sidoo kale waa laga bixiniyaa dadka aan caymis ku jirin. Adeeg bixiyahaagu kuguma soo dalici karo in uu lacag kaa qaato booqasho xafiiseedka haddii aad kaliya u aado inaad ka hesho tallaalka.



Weydii dhakhtarkaaga inta qiyaasood ee aad u baahan tahay. Si ay si buuxda waxtar ugu yeeshaan, tallaalada Moderna iyo Pfizer waxay u baahan yihiin laba qaadasho, oo u dhexeeya saddex illaa afar toddobaad, halka Johnson & Johnson ay u baahan yihiin oo keliya hal qiyaas.



Tallaallada COVID-19 waa kuwo ammaan ah oo waxtar leh.

Tallaallada COVID-19 waa kuwo ammaan ah oo waxtar badan leh. Dhammaan tallaallada COVID-19 waa inay maraan baaritaan adag iyo qiimeyn kahor intaan la adeegsan. Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Mareykanka (FDA) ayaa u oggolaaday tallaallada loogu talagalay isticmaalka degdegga ah mana helin wax walaac ah oo xagga nabadgelyada ah. Khubaro madaxbanaan ayaa xaqiijiyay inay la kulmayaan heerar sare oo badbaado iyo waxtar leh.



Waxaad dareemi kartaa waxyeelo. Sida tallaalada kale ee caadiga ah, waxaad heli kartaa cudud xanuun, qandho, madax xanuun, ama daal ka dib markaad is tallaasho. Kuwani waa calaamado muujinaya in nidaamka difaaca jirkaagu uu dhisayo difaac.



Midba midka kale ha ilaaliyo nabadgelyada ka dib marka aad is tallaasho.

Halka talaalku kahortagi doono dadka intiisa badan inay xanuunsadaan. waxaan wali baraneynaa sida wanaagsan ee looha hortago faafitaanka COVID-19. Sii wad inaad xirto maaskaro, ka fogoow lix fiit (laba mitir) dadka kala, oo hubi hagida CDC ee dadka si buuxda loo tallaalay: bit.ly/fully-vaccinated

SEDEEN TALAALKA U HELAYAA

Marka ugu horeysa, tallaalka COVID-19 waxaa la geyn donaa oo ku koobnaan doontaa guud ahaan gobolka iyo waddanka oo dhan. Tallaalka waxaa marka hore la siin doonaa kooxo gaar ah oo halista ugu badan ku jira, sida shaqaalaha daryeelka caafimaadka, dadka waayeelka ah, iyo dadka ku jira goobaha isku imaatinka.

Laga bilaabo Abriil 15, 2021, qof kasta oo jira 16 sano ama ka weyn wuxuu xaq u leeyahay tallaalka.

Sahayda tallaalka iyo ballamaha ayaa xilligan xadidan. Tallaalka waxaa heli kari doona dad badan markii in badan la keeno. Ugu dambeyntii qof kasta oo doonaya tallaalka wuxuu awoodi doonaa inuu helo talaalka.

Jadwalka iyo ballanta

Ikhtiyaarrada jadwalka haddii aad xaq u leedahay tallaalka:

- 1) Wac xafiiska dhakhtarkaaga ama daryeel caafimaad bixiyaha** si aad u ogaato haddii ay leeyihiin ballamo tallaalka.
- 2) Adeegso Tilmaamaha Tallaalka Gobolka Washington** (xul luqadda xagasha midig ee korka midigta): [VaccineLocator.doh.wa.gov](https://www.vaccineLocator.doh.wa.gov)
- 3) Ma ubaahantahay caawimaad in lagu sameeyo balanta talaalka ee taleefanka?** Wac Xarunta Wicitaanka ee King County COVID-19 maalin kasta inta udhaxeysa 8 AM - 7 PM markay tahay 206-477-3977. Turjubaano ayaa la heli karaa - sheeg luqadda aad u baahan tahay markii aad soo wacdo.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan cidda tallaalka heli karta hadda iyo sida loo tallaalo: kingcounty.gov/covid/vaccine/somali

GAADIIDKA LAGU SOO QAADAYO TALAALKAAGA

- Caawimaad taleefan, ka wac Khadka Caawinta Tallaalka Isku-darka taleefanka **425-943-6706 Isniinta-Jimcaha inta udhaxeysa 8:30 AM - 4:00 PM. Garaac 5 turjumaad.** Waxa kale oo aad ka tagi kartaa farriinta codka oo dib loo soo wici karaa.
- Si aad u codsato gaadiid dad badan, fadlan booqo (Ingiriis kaliya): bit.ly/vaxride
- Si aad wax uga barato xulashooyinka gaadiidka, oo ay ku jiraan waayeelka, dadka naafada ah, dadka qaata Medicaid, iyo halyeeyada soo booqda: FindARide.org/COVID